



# San Diego Unified School District

## Fact Sheet

### Laba iyo toban arrimood oo ay Maamuleyaashu sameyn karaan si dugsiga rabshada looga joojiyo

Golaha Ka-hortegga Dembiyada ee Qaranku waxay soo taxeen aragtiyo ay isleeyihiin waxay kaalmo ka geysan karaan in dugsiga rabshada lagaga joojiyo. Qaarkood waxay u baahan yihiin ficil uu shakhsi sameeyo oo keliya; qaarna waxay u baahan yihiin dadaal wadajir ah. Kuwa kalena waxay soo bandhigaan sababaha rabshada dhaliyey. Waxaad tan u qaadataa inay bilow tahay-waxaa jira waxyaabo badan oo la sameyn karo.

1. Waxaad abaalmarin siisaa ardeyga dabeecada wanaagsan leh. Ardeyda waxyaabaha saxda ah sameysa ee khilaafka wada hadalka ku dhammeysa ama ardeyda kale caawisa ama raaligelin siisa kuwa kale waxay wax ka beddeleyaan jawiga dugsiga oo dhan.
2. Waxaad sameysaa waxyaabo waalidiinta u sahleya inay nolosha ilmahooda u hawlgalaan. Liis dad iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya samee; waxaad waalidiinta ka codsataa inay telefoono; waxaad maalmaha Sabtida iyo Axada iyo weliba habeenada maalmaha dugsiga la dhigto. Waxaad sameysaa meel carruurta yaryar lagu hayo.
3. Waxaad dhaqan-gelisaa nidaamyada ku saabsan "waxyaabaha aan marna loo dulqaadan karin" ee hubka iyo rabshada. Waxaad marka horeba sheegtaa ciqaabaha la muteysanayo. Waxaad ardeyda, waalidiinta iyo shaqaalaha la socodsiiisaa nidaamyada iyo ciqaabta. Waxaad kaloo ku soo dartaa inay ardeydu iyagoon magacooda sheegey ay soo gudbiyaan arrimaha dembiyada ku lug leh, taas oo aan muujineyn wax aar-goosi ku lug leh.
4. Waxaad la shaqeysaa kooxaha jaaliyada iyo kooxaha nabadgelyada ama ammaanka ilaaliya si ay ardeydu nabadgelyo u helaan marka ay dugsiga ku sii socdaan iyo marka ay ka soo socdaanba. Xataa carruurta waaweyn waxay door-bidaan inay guriga iska joogaan halka ay kala kulmi lahaayeen kuwo u xoog sheegta ama waxyaabo kale oo handadaad ah. Waxaad kaalmo ka geysataa sidii aad u ogaan lahayd uguna qeyb qaadan lahayd meelaha jiiraanka ah ee ay rabshadaha badan ka dhacaan.
5. Waxaad dhiirigelisaa oo aad sameysaa barnaamijyo iyo dhacdooyin rabshadaha lagaga hortegayo, taas oo ay hawlaheedu ardeydu masuul ka yihiin. Hawlahaas oo ka kooban waxbarashadda carruurta, maxkamadaha dhallinyarada, dhexdhexaadinta la-talinta iyo tababaradda.
- 6.
7. Waxaad xoojisaa nidaamyada dugsiga ee khatarta rabshadaha dugsiga yareynaya. Waxaad masuuliyadeeda qaadaa waxyaabaha fasalka dhexdiisa iyo ka baxsan ka dhacaya.
8. Waxaad ardeyda ku adkeysaa in aysan magacyo xunxun isugu yeedin, is foorjeyn ama isu xog sheegan. Waxaad k dhiirigelisaa inuu ardey kasta muujiyo ixtiraamka uu kuwa kale ka fileyo.
9. Waxaad ardeyda wax u bartaa si xamaasad leh. Ardeyda ku mashquulsan hawlaha loolanka leh, warbixinta muhimka ah haysa, iyo abaalmarinada hela wey adag tahay in mushkilado la soo gudboonaato.
10. Waxaad barataa, ardeydana udhigtaa siyaabaha khilaafka loo xaliyo, iyo xirfadaha cadhada lagu dejiyo. Waxaad ardeyda ka caawisaa inay arrimahaas maalin kasta noloshooda ku dabaqaan. Waxyaabaha aad ardeyda bartid kala sheekeeyso, kana wada dooda.
11. Marka aad maado ardeyda u dhigeysid waxaad ku soo dartaa rabshadaha iyo siyaabaha looga hortego mar kasta oo ay macquul tahay.
12. Waxaad ardeyda ku dhiirigelisaa inay ka soo warbixiyaan dembiyada ama falalka ay ka shakiyaan ee aan habbooneyn.

OO KOOBAN	
❖	Maamulaha dugsiga ama madaxda kale ee ku habboon la socodsii wax kasta oo rabshad leh ama dabeecadaha aan habbooneyn ee aad ka shakidiid
❖	Marna rabshadaha ha oggolaanin
❖	Waalidiinta ku martiqaad si aad uga wada hadashaan horumarka uu ilmahoodu sameynayo
❖	Waxaad barataa calaamadaha ardeyda u horseedaya rabshadaha
❖	Waxaad dhiirigelisaa barnamijyo iyo dhacdooyin rabshadaha lagaga hortegayo oo ay ardeydu masuul ka yihiin
❖	Waxaad ku biirtaa kooxda nabadgelyada dugsiga oo u sheegaysa shaqaalaha marka ay xaalad degdeg ah dhacdo waxa ay sameynayaan
❖	Waxaad qaadaa masuuliyada goobaha fasalka dhexdiis ah ama ka baxsan
❖	Ardeyda ku dhiirigeli inay ixtiraam muujiyaan
❖	Si xamaadsad leh ardey wax u bar
❖	Waxaad barataa, ardeydana u dhigtaa siyaabaha khilaafka loo xaliyo iyo xirfadaha cadhada lagu dejiyo
❖	Waxaad dhiirigelisaa in laga doodo ka hortega rabshadaha
❖	Waxaad ardeyda ku dhiirigelisaa inay si dakhso ah uga soo warbixiyaan dembiyada ama falalka ay ka shakiyaan ee aan habbooneyn

SOMALI VERSION: PRINCIPALS STOP VIOLENCE

Maqaalkan waxaan ka helnay, fasaxna noo siiyey inaan daabacno Golaha Ka-hortegga Dembiyada Qaranka VIKII warbixin dheeraad ah ee ku saabsan Golaha Ka-hortegga Dembiyada Qaranka waxaad heli kartaa shabakada Internetka ah: ([www.ncpc.org](http://www.ncpc.org)).

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan Adeegyada Booliiska San Diego waxaad ka heli kartaa Shabakada Internetka ah: (<http://www.sandi.net/policeservices/>).

Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay ururka Annie E. Casey Foundation